

**QAYBTA KOOWAAD
SHARCI**

SHARCI L. 16 ee 20 Maaajo '79, Dastuurka Jamhuuriyadda Di-
muqraadiga Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY Xaashada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-
caanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo
1976 kuna saabsanaa Xukunka Dalka oo loo wareejiyey Xisbiga
Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY Qod. 7aad ee Xaanshada 1aad, iyo kan
9aad ee Xaanshada 3aad ee Kacaanak 21 Oktoobar 1969 oo ku
saabsan DASTUURKA JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SO-
MALIYA Aftidiisa iyo doorashada Cadaaladeed ee Dadweynaha;

ISAGOO TIXGELIYAY Go'aankii Golaha Dhexe ee X.H.K.S.
iyo guddoonkii Shirweynaha aan Caadiga ahayn ee Xisbiga
Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kuna saabsanaa oggo-
laanshada DASTUURKA JAMHURIYADA DIMUQRADIGA SO-
MALIYA oo ay soo diyaariyeen Guddiga Mashruuca Dastuurka
JDS oo lagu dhisay Xeer Madaxweyne lamb. 90 iyo 91 ee 20 Ok-
toobar 1977;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Waxaa la oggolaaday DASTUURKA JAMHURIYADDA DI-
MUQRADIGA SOOMAALIYA.

Qod. 2

DASTUURKA JDS wuxuu ka kooban yahay 114 qodob wa-
xaana loo bandhigi doonaa Dadweynaha Soomaaliyeed ee Jam-
huriyadda deggan si ay codkooda uga dhiibtaan si Madax
Banaani ah.

Qod. 3

DASTUURKA waxaa lagu baahin doona Faafinta Rasmiga
ee J.D.S. Raadiyooga iyo wargeysyada rasmiga ah si ay dadwey-
naha ula socdaan:

Qod. 4

Sharcigan wuxuu dhaqan galaayaa maalinta lagu soo saaro
Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
Muqdishu, 20 Mag. 1979